



MOF/OM/1828/2023

Maarso 19, 2023

**Xeer-nidaamiyaha Ajuurada Maxkamaddaha, iyo Khidmada Diiwangelinta & Midda Sanadlaha ah ee Qareennada (ee soo baxay bisha Maarso, 2023)**

**Isagoo fulinaaya** mid ka mid ah ujeedooyinka lagu sheegay Qodobka 1(2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee la xiriira dabagalka dakhliga;

**Isagoo u hoggansamaya** mabda'a lagu sheegay Qodobka 2 (1) (r) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in dhammaan dakhliga ka soo baxa ilaha lacagta caddaanka ah ee Dawladda iyo hay'adaheeda lagu shubo halka xisaab ee "Khasnadda Mideysan", laguna ilaaliyaa lacagtaas iyada oo la raacayo maareyn hufan oo wax-ku-ool ah;

**Markuu arkay** Xeerka Ajuurada Maxkamaddaha (Lr.109 ee 14 November 1973) iyo Xeerka Wax Ka-beddelid Ujuuradaha Maxkamadaha ee Madaniga ( Lr. 37 ee 16 Maajo 1981);

**Markii uu arkay** jiritaanka Guddiga talabixinta & Diiwangelinta Qareennada ee lagu aas-aasay Sharci Lr. 85, 21 Octoobar, 1975 iyo waliba dadaalka ay ku bixinayaan diiwaangelinta qareennada iyo ilaalinta Diiwanka Qareennada (Albo);

**Markuu arkay** Qodobka 9-aad ee Sharci Lr. 85, 21 Octoobar, 1975 iyo Qodobka 42-aad Faqradda (h) ee Dastuurka Ku-Meel Gaarka ee La Ansixiyey August 1, 2012

**Isagoo gudanaya** awoodaha lagu siiyey Qodobka 6-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Lr. 13 ee 27 October 2019) ee tilmaamaya inuu soo saarayo Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan-galiyo sharciyada dakhliga;

**Wasiirka Maaliyadda wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyahaan:**

**Qodobka 1-aad**

**Jaangoynta Ajuurada Maxkamadaha iyo Khidmadda Diiwangelinta & Midda Sanadlaha ah ee Qareennada**

1. Ujuurada iyo Khidmadda lagu sheegay jaantusyada hoose ayaa noqon doona kuwo la dabaqayo marka uu dhaqan galo Xeer-nidaamiyahaan:

<b>Maxkamadda Sare</b>		
<b>Lr.</b>	<b>Nooca Adeega</b>	<b>Ujuurada La Saaray</b>
1.	Gal-furis Madani	\$200
2.	Gal-furis Idaari	\$300
3.	Gal-furis Dacwad Shaqaale	\$30
4.	Dib U-eegis	\$300
5.	Gal-furis Dacwad Doorasho	\$2,000
6.	Gal-furis Dacwad Dastuuri ah	\$1,000
7.	La wareegid damaanad taalay	\$ qiimaha la go'aamiyo
8.	Ganaax	\$ qiimaha ganaaxa
9.	Xabsi gadasho	\$ qiimaha xabsiga
<b>Maxkamadda Rafcaanka</b>		
<b>Lr.</b>	<b>Nooca Adeega</b>	<b>Ujuurada La Saaray</b>
10.	Gal-furis Madani (dacwad katimid gobolka)	\$200
11.	Gal-furis Madani (dacwad katimid degmooyinka)	\$30
12.	Ansixin Wakaalad	\$20
13.	Diiwaan galinta hantida maguurtada ah	\$20
14.	Diiwaangalin Rahan	\$30
15.	Diiwaan gelinta shirkadaha	\$50
16.	La wareegid damaanad taalay	\$ qiimaha la go'aamiyo
17.	Ganaax	\$ qiimaha ganaaxa
18.	Xabsi gadasho	\$ qiimaha xabsiga
<b>Maxkamadda Gobolka</b>		
<b>Lr.</b>	<b>Nooca Adeega</b>	<b>Ujuurada La Saaray</b>
19.	Gal furis Dacwadda Madaniga ah (halmar)	\$200
20.	Dacwad shaqaale	\$30
21.	Fulin	1%
22.	Sugitaan Mulkiyad	\$300

SH/4

23.	Dacwadaha gaagaaban	\$250
24.	La wareegid damaanad taalay	\$ qiimaha la go'aamiyo
25.	Ganaax	\$ qiimaha ganaaxa
26.	Xabsi gadasho	\$ qiimaha xabsiga
<b>Maxkamadaha Degmooyinka</b>		
<b>Lr.</b>	<b>Nooca Adeega</b>	<b>Ujuurada La Saaray</b>
27.	Shahaadada Furriinka	\$150
28.	Shahaadada Guurka	\$30
29.	Gal-furis madani/ dhaxal	\$30
30.	Wakaalad	\$20
31.	dhaxal koob	\$20
32.	Dhaxal Qaybin	2%
33.	Shufca	2%
34.	Warqad Ogolaansho (Qayim)	\$30
35.	Cadayn Waalid/ Xanaaneeye	\$30
36.	Cadeyn waxkabadalid baasaboore	\$20
37.	Cadeyn dukuminti lumay	\$20
38.	Cadeyn dhimasho	\$30
39.	Cadaymaha yaryar	\$20
40.	La wareegid damaanad taalay	\$ qiimaha la go'aamiyo
41.	Ganaax	\$ qiimaha ganaaxa
42.	Xabsi gadasho	\$ qiimaha xabsiga
<b>Guddiga Talabixinta &amp; Diiwangelinta Qareennada (Qodobka 5-aad ee Sharci Lr. 85, 21 Octoobar, 1975)</b>		
<b>Lr.</b>	<b>Nooca Adeega</b>	<b>Tacriifada La Saaray</b>
43.	Diiwangelinta Qareenka iyo bixinta Shahaadada Diiwangelinta Qareenka	\$300
44.	Tacriifo sanadeedka lagu soo rogay isticmaalka <sup>1</sup> Shahaadada Diiwaangelinta Qareenada	\$150

<sup>1</sup> Qareenka waxaa uu isticmaalay Shahaadada Diiwaangelinta Qareenka haddii uu shakhsi ku matalo maxkamad ku taala Soomaaliya horteeda sannad maaliyadeedka tacriifadu waajibtay gudhiisa.

<sup>1</sup> Qareenka dalka qalaad waxaa uu isticmaalay Ogolaanshiyaha haddii uu shakhsi ku matalo maxkamad ku taala Soomaaliya horteeda sannad maaliyadeedka tacriifadu waajibtay gudhiisa.

Wasaaradda Cadaaladda (Qodobka 10-aad Sharci Lr. 85, 21 Octoobar, 1975)		
Lr.	Nooca Adeega	Tacriifada La Saaray
45.	Ogolaanshiyaha lasiiyo Qareenada Dalalka Qalaad - marka kowaad	\$1000
46.	Tacriifo sanadeedka lagu soo rogay isticmaalka <sup>2</sup> Ogolaanshiyaha lasiiyo Qareenada Dalalka Qalaad	\$500

**Qodobka 2aad**  
**Bixinta iyo Ururinta Ajuurooyinka iyo Khidmaddaha**

1. Ajuuradda iyo Khidmadda waxaa uruurinaaya shaqaalaha/saraakiisha Wasaaradda Maaliyada ee loo idmay ee ku sugan Maxkamadaha, Wasaaradda Cadaaladda iyo degooyinka Gobalka Banaadir.
2. Dhammaan shaqsiyaadka bixinaya ujuurooyinka iyo khidmaddaha waxaa la farayaa in ay ku shubaan lacagahaas koontooyinka dakhliga aan cashuuriga ahayn ee ka furan Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ama koontooyinka kale ee ka furan Bangiyada kale oo ay Wasaaraddu cayinto.

**Qodobka 3-aad**  
**Nidaaminta Galalka Dacwadaha Saboolka ah**

1. Maxkamadda Sare iyo Wasaaradda Maaliyadda oo iskaashanaya ayaa muddo bil ah kusoo saaray **Foomka Codsiga Dacwoodaha Saboolka ah**, kaas oo ka koobnaan doona aarimaha soo socda:
  - (b) Magaca iyo lambarka shakhsiga saboolka ah ee ajuurada laga dhaafay;
  - (t) Xog-kooban ee ku saabsan nuuca dacwadda qofka saboolka ah;
  - (j) Xog-kooban oo muujinaysa sababta ajuurada looga dhaafay;
  - (x) Cadadka lacagta ajuuradaha ee laga dhaafay; iyo
  - (kh) Lambarka galka dacwadda.
2. Qofkasta ee sabool ah waxa uu buuxinaya Foomka Codsiga ee Dacwoodaha Saboolka ah, waxaana ansixin doona Guddoomiyaha Maxkamadda ee dacwadu hortalo, iyadoo nuqul ka mid ah foomka la ansixiyay loo geyn doono saraakiisha loo idmaday ee Wasaaradda Maaliyadda ee Maxkamadda ka hawl-gala.
3. Saraakisha Wasaaraddu waxay u gudbinaayaan foomamka loo keenay oo dhan bishiiba mar Agaasimaha Waaxda Cashuuraha Berriga ee Wasaaradda Maaliyadda si uu u xisaabiyo qaddarka ajuurada ee la dhaafay, isagoona Wasiirka Maaliyadda la wadaagi doona warbixin billa ah.



#### Qodobka 4-aad

### Warbixinta Korjoogtenta Dhaqan-galka Xeer-nidaamiyaha

1. Waaxda Cashuuraha Berriga ee Wasaaradda Maaliyadda waa inay korjoogteysaa u hoggaansanaanta Xeer-nidaamiyahaan, oo ay soo saartaa warbixin lix bilood ah oo ay la wadaageeyso Wasiirka Maaliyadda.


#### Qodobka 5-aad

### Joojin Xeer-nidaamiye hore iyo dhaqangalka iyo faafinta Xeer-nidaamiyahaan

1. Isticmaalka Xeer-nidaayihii hore ee Ajuurada Maxkamadda ee la soo saaray Sebtembar 20-keedii, 2020, waa la joojiyay.

2. Xeer-nidaamiyaha Ajuurada Maxkamaddaha, iyo Khidmada Diiwangelinta & Midda Sanadlaha ah ee Qareennada waxa uu dhaqan-gelaya taariikhda uu saxiixo Wasiirka Maaliyadda.

3. Nuqullada Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu faafinaya mareegta (website) Wasaaradda Maaliyadda iyo midda Maxkamadda Sare.



Taariikh:

19/03/2023

**Dr. Cilmi Maxamuud Nuur**  
**Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**